



ANNAGU ♥ KOONFUR BARI EE SEATTLE

SOMALI

Hagaajino ammaan cusub ayaa lagu samayn doonaa Waddada Rainier Ave S

Gu'ga 2018

DULMARKA MASHRUUCA

Sannadkii 2014, waxaan biloownay Mashruuca Haggajinta Waddada Rainier Ave S (Rainier Ave S Corridor Improvements Project) si aynu dib u eegis ugu samayno xaaladaha ammaanka tooska waddada Rainier Avenue S inta u dhaxaysa S Alaska St iyo S Henderson St. Ujeeddeeyinkeenu waxay yihiin:

- In aynu si dheelli tiran u yarayno xawaaraha baabuurta iyo shilalka ka dhasha xawaaraha
- In aynu yarayno tirada dhaawacyada halista ah ama isku dhacyada ama shilalka halista ah
- In aynu hagaajino is-goysyada
- In aynu faraha ku heyno tayada basaska iyo ku tiirsanaantooda

Mashruucaan waa qayb ka mid ah barnaamijka Seattle ee Vision Zero si loo gaaro dhimasho la'aan baabuurta ah ama dhaawacyo halis ah sannadka 2030. Waxaynu qorshaynaynaa in mashruucan si la mid ah RapidRide Rainier aynu usii wadno tayada iyo isku halaynta baska halka sidoo kale la wanaajinayo ammaanka hareeraha Waddada Rainier Ave S.

HAGAAJINADA SOO SOCDA

Sannadkii 2015, waxaynu dhamaynay Wejiga 1aad oo mashruucan markii aynu dib u nakhshadaynay Waddada Rainier Ave S inta u dhaxaysa S Alaska St iyo S Kenny St laga bilaabo afar illaa seddex leeman. Sannadkii 2017, waxaynu ku weydiisanay fikirkaaga ku aadan nakhshadaha labbada ah ee la filanayo ee loogu talagalay Wejiga 2 ee mashruucaan - laga bilaabo S Kenny St illaa S Henderson St. Labada mowduuc ee ugu sheegista badnaa waxay ahaayeen taageero loogu talagalay bartamaha leemanka laga laabto iyo baahida loo qabo adeega Waddada 7 Metro ee la isku halayn karo ahna joogto.

Kadib markii aynu dib u eegnay talooyinkii dadka ay bixiyeen, anaga oo la shaqaynayna shurakadeena jooga King County Metro Transit, iyo qaabka taraafikada, waxaynu soo jeedinaynaa Bedelka 1 ee loogu talo



Maanta



Ka dib dhismaha (dayrta 2018)

galay fulinta laga bilaabo Waddada S Kenny St illaa S Henderson St. Bedelkaan waa in loo sameeyaa sida ugu dhakhsiyaha baddan ee dayrta sannadka 2018*.

Sidoo kale anaga waxaynu tixgelinaynaa isbedelo lagu sameeyo is-goysyada Waddada S Henderson St. Ayada oo ay sabab u tahay adkaanta fiilooyinka kore ee baska ee ku yaala meeshaan, waxaynu isticmaali doonaa sannadka soo socda iyo barkiisa in aynu ka shaqayno nakhshadda aynuna aqoonsano maalgelinta si hagaajinada loogu sameeyo mashruuca RapidRide Rainier.

*Jadwalka waxaa dhici karta in uu isbeddelo.

Waxaa laga maalgeliyay Canshuurta 9-sanno ee Move Seattle, waxaana oggolaaday codbixiyayaasha sannadkii 2015. Ka oggoow inbaddan oo ku saabsan canshuurta halkan www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle.



Seattle
Department of
Transportation


VISION
ZERO
SAFER STREETS FOR SEATTLE

The Levy to
MOVE SEATTLE

MAXAA LA FILANAYAA INTA LAGU GUDA JIRO DHISMAHA

Dhismaha waxaa la filanayaa in ay dhacdo sannadkan (dayrta 2018)* waxayna u badantahay in ay dhacdo dhowr maalmood oo dhammaadka todobaadka ah. Saarida dariiqa leenka waxay dhacaysaa habbeenkii, halka rinjiyaynta iyo ku samaynta calaamadaha ay dhacayso inta lagu guda jiro maallinta. Waxaynu ku shaqayn doonaa in aynu yarayno saamaynta dadweynaha sida ugu suurto galka ah mana la filanayo in la sameeyo wadooyin wareeg ah. Fiiri boostadaada si aad ula socotid macluumaad baddan oo ku saabsan dhismaha xagaagaan.

BEDELKA LA SOO JEEDIYAY



Leemanka baabuur dhigashada Leenka baabuurka lagu wado Leenka dhexe ee leexashada Leenka baabuurka lagu wado Khadka baska (waa caadi in loo leexo midig)

Hagaajinada Vision Zero (eegid waqooyi) si loo sameeyo sida ugu dhakhsiyaha baddan ee Dayrta 2018 laga bilaabo Waddada S Kenny St – S Henderson St.*

Mashruuca RapidRide Rainier wuxuu dhisi doonaa boosteejooyin cusub sidoo kale wuxuu dhisi karaa hagaajino rayid kale. Waxaynu si joogto ah indhaha ku heyn doonaa waddada waxaana samayn doonaa isbedelo dheeraad goortii ay ku habboon tahay.


MACLUUMAADKA IYO XIRIIRKA MASHRUUCA

www.seattle.gov/transportation/rainieraves.htm

James Le, Maamulaha Mashruuca

RainierAveS@Seattle.gov | (206) 684-3174

KHARIIDADA MASHRUUCA



TUSMOOYIN

- Wejiga 1 (la dhammeeyay 2015)
- Wejiga 2 (waxaa la filayaa dayrta 2018)
- ⋯ Waddada RapidRide Rainier ee mustaqbalka (la filanayo 2021)